



## **Qadada waxay ardayda Richmond siisay dhadhanka Japan**

Richmond waa dugsi hoose wuxuu ka tirsan yahay barnaamijka labada luqadood ee Japanese-ka ee PPS, iyada oo ardaydu ay maalin kasta ku dhex jiraan waxyaabo badan oo ka kooban Japan. Jimcihi, waxay qaadeen talaabo dheeraad ah, iyaga oo helay dhadhanka saxda ah ee dhaqanka.

Dugsigu wuxuu maalintiisii saddexaad qabtay Maalinta Qadada Japanese-ka, iyadoo carruurtu cuntay digaaga Japan-ijo-khudrad leh ‘curry’ oo bariis lagu daray, oo wadata qajaar iyo saladhka kaabajka Aasiyaanka, liinta mandarin-ta iyo tufaax daray ah oo la jarjaray. Waxay cuntadu ka kooban tahay waxaa isku keenay waalidka Andrea Obana iyada oo lala kaashanayo Adeegyada Nafaqada PPS.

Ardayda waxaa lagu dhiirigeliyay in ay dhahaan “Itadakimasu,” oo ah eray caado u ah Japanese-oo la yiraahdo cuntada ka hor oo inta badan loo turjumo in uu macnihiiisu yahay “Si ixtiraam lehayaan u qaadanayaa,” laakiin waxaa lala dhahaa dhawaqa ah, “Aynu cuno.”

Ulahe wax lagu cuno ayay heli karayeen ardaydu si ay isticmaalaan, badankooduna way sameeyeen, iyada oo ay jirtay heerar kala duwan oo dhanka xirfadda ah oo ay lahaayeen. Ardayda cuntay nooca cuntada ‘curry’ ayaa la siiyay warqado ay ku dhejiyaan qaybta dugsiga hoose ee sida Yelp oo kale ah: oo ah meel wax lagu qoro oo ka koobnayd saddex qaybood: “Ma aan jeclaysan,” “Waxay ahayd CAADI” and “Waan jeclaaday!!” Inta badan waxay doorteen “Waan jeclaaday!!”

Qadadu kaliya ma ahayn mid fiican, ee waxay ahayd mid sidoo kale diiran. Waxa sidoo kale ardayda ka caawisay in ay la qabsadaan cunto laga yaabo in ay cunaan inta lagu jiro safarka sanadlaha ee ay maalgeliyeen-waalidiinta ardayda fasalka shanaad ee lagu aadayo Japan. Ardayda fasalka sideed ee Dugsiga Dhexe Mt. Tabor, ee halka uu ka sii socdo barnaamijka habka waxbarida ee labada luqadood ee Japanese-ka (kuna soo gebagaboobera Dugsiga Sare ee Cleveland), waxay safar uu dugsigu maalgeliyay sanad kasta ku aadaan Japan.

Asta Garman, Maamulaha Barnaamijka Adeegyada Nafaqada, ayaa sheegtay in ay degmadu Febraayo qaban doonto Maalinta Cuntada Chinese-ka, iyada oo Richmond ay qorshaynayso in ay waqtiga gu’ga qabato Maalinta Qadada Japanese-ka oo kale, oo wadata cuntada baastada ee yakisoba.

*-Mike Tokito*